

# LA TACAALIDA QOYAANKA & CAARYADA

## Ballanqaadkeena ku aadan macaamiisha Curo

Waxaan rabnaa inaan dhammaan macaamiisheena siino oo aan joogteyno bixinta guryo badbaado, caafimaad leh, oo qiimahooda la awoodi karo iyo guryo diirran oo aan lahayn qoyaanka, caaryo ama burbur. Waxaan si dhab ah u qaadanaa dhammaan tusaalooyinka ama warbixinnada qoyaanka ama caaryada, waxaan ballan qaadaynaa:

- ✔ Inaan dhammaan warbixinnada qoyaanka iyo caaryada si dhab ah u qaadano iyo arrimaha caafimaadka iyo badbaadada la xiriira, ee ma aha codsiyada dayactirka guryaha.
- ✔ Uma qaadan doono in uumiga iyo caaryada ay sababaan 'qaab nololeedka'.
- ✔ Inaan furno kiiska dhacdo kasta oo la ogaaday oo qoyaanka iyo caaryada ah, iyo inaan ka dhigno kiiskan inuu sii furnaado ilaa qof kastaa uu kaga qanco in dhibaataada la xalliye.
- ✔ In mudnaanta siino kiisaska ka jira guryaha ku nool dad isla markaana ka jira walaacyo la xiriira caafimaad ama dayacanno kale oo ka sii darsiin karta jiritaanka caaryada.
- ✔ Waxaan isticmaali doonaa hab daryeel iyo taageero leh, annagoo aqoonsan in gurigaaga oo yeesha caaryada ay noqon karto arrin murugo leh.
- ✔ Inaan isticmaalno qalabyada qoyaanka iyo caaryada ee gaarka ah si ay nooga caawiyaan si degdeg ah u raadinta iyo hagaajinta sababta ka dambaysa dhibaataada.
- ✔ Inaan xaqiijino in dhammaan sahamiyayaasheena iyo kormeerayaasheena guryaha ay helaan tababar takhasus ah oo ku saabsan raadinta/ogaanshaha iyo wax ka qabashada dhibaatooyinka qoyaanka iyo caaryada.
- ✔ Inaan qabano wixii dayactir ah ee loo baahan yahay ee la xiriira qoyaanka iyo caaryada sida ugu dhakhsaha badan ee ugu waxtarka badan si loo yareeyo burburka guriga.
- ✔ Inaan xaqiijin doono in dhammaan dhaqaalaha Curo ee booqda ama si toos ah ula shaqeeya macaamiisha ay si fiican u fahamsan yihiin qoyaanka, caaryada iyo uumi-biyoodka si ay u awoodaan inay bixiyaan talooyin waxtar leh.
- ✔ In marka ay booqanayaan guryaha macaamiisha, ay shaqaalaheena waydiiyaan haddii ay jiraan dhibaatooyin la xiriira qoyaanka iyo caaryada, kadibna ay si dhakhso ah u soo sheegaan wixii dhibaato ah.
- ✔ Inaan macaamiisha siino macluumaad wax ku ool ah oo ku saabsan sida loo yareeyo uumi-biyoodka haddii taasi ay ka qayb qaadanayso samaysanka caaryada.
- ✔ Inaan guryaha macaamiisheena ka ilaalino sii xumaashaha iyo waxyeelada ay sababaan, ama qeyb ka ah sababta keenaysa, qoyaanka iyo caaryada.
- ✔ Inaan isticmaalno xog, aqoon iyo khibrad si aan u fahano sida noocyada kala duwan ee guryaha iyo dhisidooda ay u saameeyaan suurtogalnimada ah inay samaysmaan qoyaanka iyo caaryada. Waxaan xogtaas isticmaali doonnaa marka aan qorsheyno sida aan u maalgashanayno hagaajinta guryaha iyo dhisidda guryo cusub.



Iskaan gareey halkaas si aad wax badan uga ogaato



Si aad uga soo warbixiso qoyaanka ama caaryada, ama haddii aad rabto in lagaa caawiyo la dagaalanka uumi-biyoodka, fadlan nala soo xiriir ama booqo [www.curo-group.co.uk/dampandmould](http://www.curo-group.co.uk/dampandmould).

[www.curo-group.co.uk/contact](http://www.curo-group.co.uk/contact)

